



# TAREENKA FUDUD EE KHADKA CAGAARAAN



## TALOoyINKA BADBAADADA EE ARDAYDA DUGSIYADA DADWAYNAHA EE SAINT PAUL

BADBAADADU WAA # 1. Tareenada fudud ee magaalada loo kala raaca waa hab sahlan oo magaalada daafaheeda loogu kala gudbi karo, balse waa inaad had iyo jeer aqbashaa oo aad raacdaa calaamadaha digniinta bixinaya ee ku dhowdhow xadiidka iyo meesha tareenka laga raaco. Waxaad barataa talooyinka aadka u sahlan ee si aad si badqabta tareenka fudud ugu raaco.

### DHACA KASTA ISKA EEG MARKAAD JOOQTO MEESHA TAREENKA LAGA RAACO

- Tareenku wuxuu ka imaan karaa dhinac kasta oo labada xadiid ah, wuxuuna imaan karaa mar kasta. Haddaba iska hubi inaad labada dhinacba eegto inta aadan xadiidka goinin.
- Tareenadu waxay ku socdaan xawli ka badan sida ay u muuqdaan inay u socdaan, isla markaana sida baabuurta si dhakhsa ah kuma istaagi karaan.
- Foojignooow markaad marayso meelaha tareenka laga raaco ama boosteejada, iyo isgoosyada wadooyinka. Muusiga qaylada dheer, qalabka wax lagu dhegaysto iyo qalabka laqaadan karo dhamaantood way ku sii jeedin karaan taxadarkana way kaa qaadi karaan.

### DHEG AHA U RAARICI! WAAYO TAREEMADU WAA AAMUSANYIHIIN!

- Waxay tareemada xamuulka kaga duwanyihiin, waxaa laga yaabaa inaad maqal dhawaaqa tareenka ku soo haya.
- Markasta oo aad xadiidka aga joogto waa inaad taxadar badan siisaa hareerahaaga. Waa inaad dhagaysataa hoonka iyo gambaleelka lagugu wargalinayo.
- Waa inaad labada dhinacba eegta inta aadan xadiidka kusoo gaarin lug, gaari, ama bushkuleeti.

### XADIIDKU MAAHA MEEL DHEELDHEEL LOOGU CIYAARIKARO

- Waligaa ha ku soconing ama ha ku ciyaarin xadiidka dushiisa – waa khatar waana sharcidaro.
- Xadiidka waxaad ka goysaa meelaha in laga gooyo loo calaamadiyey oo kaliya. Waligaa adigoo bushkuleeti saaran ama alwaaxa taayirada leh ee skateboardk saaran birta xadiidka ha gooyin.

### DARAWALIINTA WAXAA LA XASUUSINAYAA

- Tareenadu malaha isteerin iyo taayiro kaamana leexan karaan haddii aad jidkooda ku aadan tahay.
- Waligaa ha isku dayin inaad tareen uga hormarto nalka jidka laga gooyo. Tareenku aad buu u dheereeyaa oo wuxuu ku dhaafi karaa meesha jidadku isku gooyaan mudo ilbiriqsiyo ah.
- U hogaansan qawaaniinta gaadiidka hagta dhamaantood oo ha ku dhiiran waxyaabaha ay kaaga degayaan.

#### Schools on the Green Line:



"Listen" symbol by Creatorid/Imagine, "Car" symbol by Jens Tärling, "Eye" symbol by Sergi Delgado, from thenounproject.com collection.

Waxaa laga soo xigtay: Metro Transit and Metro Green Line



Khadka Tareenka ee lagu magacaabo Metro Green Line wuxuu daboolidoonaa 11 mayl wuxuuna isku xiraa badhtamaha magaalooyinka Minneapolis iyo Saint Paul iyo xaafadaha udhexeeya. Iminka waxaa la joogaa sidii loo baran lahaa sidii si badbaada leh loogu moodi lahaa khadka tareenada fudud iyo xadiidka ay maraan.